

Sample Letter for Parents/Caregivers

Somali Version

Salaan ku socota Waalidka ama Mas'uulka ka Bacdi,

Iskuuladeenu waxay aaminsan yihiin in waxbarashada ardayda ay ku xirantahay caafimaadkooda jir ahaan iyo maskax ahaanba. Si taas loo hubiyo, loona sameeyo jawi ixtiraam ku dhisan, waxaan ka codsanay hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" ay ardaydeena siyyaan Tababarka Naxariista ee loo yaqaan "Kindness Retreat."

Laga soo bilaabo sanadkii 1987, hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" oo ah mid madax banaan, kana dhisan Minneapolis oo aan siyaasad ku shaqo lahayn ayaa dhalinyarada siinaysay barnaamijyo kobcinaya muhiimadda uu dhaqan wanaaggoo leeyahay ardayda iyo guud ahaan bulshada. Waxay hay'adaas ku dadaashaa in dhalinyaradu bartaan sidii ay ixtiraamaan naftoodaa iyo tan dadka kale marka ay iskuulka joogaan. Tani waxay u sahlaysaa ardayda in ay wadankooda iyo caalamkaba ay ka dhigaan mid aad u wanaagsan.

Tababarka Naxariista ee loo yaqaan "Kindness Retreat" ee hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" waxay shaqaalaheedu iskuulada ka sameyndoonaan jawi wanaagsan iyagoo dhalinyarada baraya inay noqdaan kuwo naxariis leh oo ka hortaga cabsi gelinta lagu sameeyo ardayda kale "bullying."

Tababarkan waa mid fir-fircooni ku jirta oo la qabad doono _____ oo loo qaban doono ardayda fasalka _____ laguna qaban doono _____.

Si waxtarka ka soo baxa tababarkaas uu u noqdo mid waara, waxaan aaminsanahay in dhamaan qeybaha kala duwan ee bulshadu ka qeyb qaataan. Sidaa daraadeed waxaan waalidiinta ku dhiirigelinaynaa inay carruurtooda kala hadlaan tababarkaas iyagoo waydiinaya su'aalahsan:

1. Tababaradee iyo ciyaarahee "activities" kuugu fiicnaa?
2. Horjoogayaashiinu "group leaders" see ahaayeen?
3. Maxaa ka mid ah falalka naxariis darrada ah ee iskuulkaaga kajira ee aad saaxibadaa kala hadashay?
4. Maxaa ka mid ah falalka naxariis darrada ah ee dhibaatooyinka kuu keena?
5. Ma ka wada hadasheen sida galaaskaagu wax uga qaban karo falalkaas?
6. Maxaa ka mid ah waxyaabihii ugu muhiim sanaa ee aad soo baratay?
7. Li sheeg hal wax oo aad berrito iskuulkaaga ka sameyn doontid oo muujinaya naxariista aad dadka kale kula dhaqantid?

Fadlan booqo websaydka youthfrontiers.org/kindness-retreat si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers," daawona viidiyow-ga ku saabsan tababarka waxgaradnimada ee "Kindness Retreat."

Nabadgelyo,

Maamule ama Macalin